



Marka Iskuulka la Xiro, Summer EBT waa Caawimaad kuu Diyaarsan!

(When School is Out, Summer EBT is Here to Help!)

Summer EBT (Electronic Benefit Transfer (Manaafacaadka Kaarka Lagu Soo Shubo)) waxaa qoysaska lagu siin karaa heerka dakhligooda si ay ilmahooda cunto ugu soo iibsadaan inta uu iskuulku ka xiran yahay xilliga kuleylaha. Xagaa kasta, qoysasku waxaa hal mar helayaan manaafacaadka ilmo kasta oo iyaga la nool. Summer EBT waa manaafacaad lagu isticmaali karo meel kasta oo aqbaleysa FoodShare, sida dukaamada cuntada badankooda, dukaamada kale, iyo suuqyada beeraleyda qaarkood.

Si toos ah ayaa ilmaha loogu soo dirayaa manaafacaadka:

- Waa in ay National School Lunch Program (Barnaamijka Cuntada Iskuullada ee Dalkoo Dhan ama NSLP) ilmaha soo oggolaado codsigooda sannad-dugsiyeedka socda si loo siiyo cunto ah bilaash ama qiimo jaban.
- Haddii ilmahaagu gaareen da'dii iskuulka oo ay qoyskaagu ku jiraan FoodShare, Wisconsin Works (W-2), Food Distribution Program on Indian Reservations (Barnaamijka Qeybinta Cuntada ee Seeraha Hindida), ama barnaamijada Medicaid ee la isu eego dakhliga; ama haddii la ogyahay inay yihiin soogalooti, ilma sharcigu ku meeleeeyey qoysaska ilmaha korsada, ama haddii ay hayso hoy la'aan.



La soco waraaqaha boostada ee bartamaha bisha Juun! Haddii qoysku xaq u yeeshaan, waxaa la soo dirayaa waraaqda manaafacaadka ilmaha.



Helitaanka Summer EBT saameyn **kuma** yeelanayo haysashada sharciga lagu joogo dalkan ee ilmaha ama qoyska.



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Waxaan u mahadcelineynaa Shaqaalaha Department of Public Instruction's School Nutrition (Nafaqada Iskuullada ee Waaxda Waxbarashada Dadweynaha) ee Wisconsin oo iyagu hagaya barnaamijka iskuullada ee Summer EBT.



P-03603SO (04/2025)

Maxaan sameyn karaa si aan u helo manaafacaadka ilmahayga haddii aysan si toos ah xaq ugu lahayn?

- Haddii iskuulka ilmahaagu ku jiro National School Lunch Program (Barnaamijka Cuntada Iskuullada ee Dalkoo Dhan ama NSLP), iskuulka ayaad ka codsan kartaa Free or Reduced Price Lunch (Cunto ah Bilaash ama Qiimajaban ama FRPL). Haddii la soo ogolaado codsiga ilmahaaga 28ka Ogoosto, 2025, waxaa sannadkan la siin doonaa Summer EBT.
- Haddii aad codsataan mid ka mid ah manaafacaad jira oo ku qoran bogga hore oo la idiinku soo oggolaato ilaa iyo 28ka Ogoosto, waxaad heli doontaan Summer EBT. Soo garaac 211 ama booqo access.wi.gov si aad faafaahin uga hesho codsiyada.
- Haddii aadan rabin inaad codsato FRPL, ama haddii NSLP iskuulka ilmahaagu aysan aqbalin codsiyada FRPL, waxaad si toos ah u codsan kartaa Summer EBT. Haddii aad codsato, waxaa lagaa rabaa inaad muujiso in qoyskaagu buuxin karo shuruudaha dakhliga ee barnaamijka. Booqo wisconsin.summerebtapp.com/begin si aad u codsato.

Sidee bay qoyskeygu u heli karaan manaafacaadka?

Haddii ilmahaagu xaq u yeeshaan Summer EBT oo aad markii hore haysatay kaarka QUEST ama kaarka P-EBT ee markii uu xanuunku faafayey, kaarkaas ayaad ku heleysaa. Haddii aadan kaarkaas haysan, waxaad boostada ku heleysaa kaar cusub oo ah QUEST.

Markaad u guurto cinwaan cusub noogu soo sheeg [SummerEBT.wi.gov/s/ SummerBenefitInfo](https://SummerEBT.wi.gov/s/SummerBenefitInfo) si lagaaga haysto macluumaad sax ah oo aad manaacaadka u hesho.

Qoysasku ma sii isticmaali karaan barnaamijyada kale ee kaarka cuntada iyagoo haysta Summer EBT?

Haa! Haddii ilmahaagu qaataan Summer EBT waxay ku sii jiri karaan barnaamijyada kale ee sida Summer Food Service Program (Barnaamijka Adeegga Cuntada Xagaaga) ama Seamless Summer Option (Habka Xagaaga ee Fudud). Si aad u hesho goobaha cuntada ee kuu dhow, booqo wisummerfood.org ama soo garaac 211. Waxa kale oo aad qoraal ah 'food' ku soo diri kartaa 304-304.

Faahfaahin Raadso

Sawiro calaamadda QR ama booqo barta dhs.wi.gov/sebt si aad u hesho faahfaahinta Summer EBT.

